



Llywodraeth Cymru  
Welsh Government



# Jaartarka Hindisaha Dheefaha Wales

Janaayo 2024



# Hordhaca



**Ballanqaadyada ku jira Jaartarka Hindisaha Dheefaha Wales waxay lagama maarmaan u yihiin Nidaamka Dheefaha Wales oo isku xidhan oo tixgelin leh kaas oo ku salaysan aqoonsiga xuquuqda aasaasiga ee aadanaha iyo sinnaanta.**

Ballanqaadyadu waxay horumarin doonaan helitaanka nidaamka, taasoo u oggolaanaysa dad badan oo degan Wales inay helaan xuquudooda ku aadan taageerada maaliyadeed iyo xaqiinta maamul hufan oo joogto u ah dheefaha Welsh ee guud ahaan Wales oo dhan.

Waa la horumariyay iyadoo lala kaashanayo daneeyayaasha guud ee muhiimka ah oo waxaana dib loo naqshadeeyay iyadoo lagu salaynayo jawaab celinta shaqsiyaadka iyo ururada taageera.

# Macluumaadka Guud



**Jane Hutt MS**  
**Wasiirka Cadaalada Bulshada iyo**  
**Hogaamiyaha Aqlibiyada Sare**  
**ee Xisbiga**

Samaynta Nidaamka Dheefaha Wales ee isku xidhan waxa ay hammi fog u ahayd Dawladda Wales iyo daneeyayaasha kale ee muhiimka ah si loo hubiyo in dadka Wales ku nool ay helaan dhammaan taageerada dhaqaale ee ay xaq u leeyihiin.

Si isbeddel weyn loogu sameeyo bixinta adeegyada dheefaha iyo adeegyada lacag-bixineed waxay u baahan doontaa dadaal wadajir ah oo ka yimaada hay'ado kala duwan, iyadoo mas'uuliyiinta maxalliga ah ay qaadanayaan doorka muhiimka ah ee hoggaamineed.

Waxaa horay u jiray dhaq-dhaqaaqyo ku aaddan isku xirka Nidaamka Hindisa Dheefaha Wales, si kastaba ha ahaatee, kuwaasi waxay ahaayeen kuwa kala qaybsan oo aan lahayn hoggaan istiraatiijiyeed oo saxan.

Waxaanu ognahay in Nidaamkeena Dheefaha Wales, oo ay ku jiraan taageerada sida Taageerada Cunnada Dugsiga ee Bilaashka ah, Qorshaha dhimista Cashuuraha Golaha, Deeqaha Aasaasiga ah ee Dugsiyada, Gunnada Horumarinta Waxbarashadu ay halbowle u yihiin boqolaal kun oo qof oo degan Wales.

Si loo xaqiijiyo in taageeradan si fudud loo heli karo waxaanu ku

shaqayn doonaa si xawli ah si aanu u horumarino oo aanu u bixino qorshe lagu horumarinayo Nidaamka Dheefaha Wales.

Dhanka kale, Dawladda Wales waxa ay go'aansatay in ay hubiso in habka loo maareeyo dheefaha Wales uu yahay mid qofka ku salaysan oo daboolaya baahiyaha shakhsiga; kaas oo ku salaysan xuquuqda iyo xaq u lahaanshaha.

Horumarinta iyo dardargelinta Jaartarka Hindisaha Dheefaha Wales waa tallaabo muhiim ah oo lagu hubinayo in habkan uu qayb ka yahay, iyo dhaqan gelinta Jaartarka ee dhammaan 22da Maamul Goboleed ayaa ah tallaabo toogan oo muhiim ah oo loo qaadayo. Waxay xaqiijinaysaa go'aanka wadajirka ah ee lagu horumarinayo helitaanka taageerada maaliyadeed ee loogu talaglay guud ahaan dadka degan Wales.

Jaartarka ayaa la sameeyay iyadoo lala kaashanayo koox ka kooban daneeyayaal iyadoo diiradda la saarayo taageerada dad danyarta ah.

Waxaan mahad balaadhan u soo jeedinayaa qof kasta oo ka qayb qaadatay hawshan horumarineed iyo shaqada kobcinta dakhliga kooxda daneeyayaasha, taas oo loo aasaasay inay horseed u noqoto isbeddel iyo horumar.

Jaartarka waa tusaale aad u wanaagsan ee ku aadan guusha la gaari karo marka aan ka wada shaqayno hadaf midaysan.

Ugu dambeyntii, Jaartarka waa qayb ka mid ah safarka ee maaha dhamaadka. Si loo dhaqan geliyo ballanqaadyada Jaartarka, waxaa muhiim ah in aan si halabuur leh oo iskaashi leh ula shaqeyno daneeyayaasha iyo Maamullada Maxalliga ah si aan u dhaqan galino.

# Ballanqaadyada Jaartarka Dheefaha Wales

## Naqshadeynta Nidaamka Dheefaha Wales

**Dawladda Wales, maamulada maxalliga ah iyo la-hawlgalayaasha kale ee adeeg bixinta, daneeyayaasha muhiimka ah, iyo dadka helaya dheefaha ayaa ka wada shaqayn doona si ay u dejiyaan nidaam loo wada dhan yahay oo:**

- muujinaya cadaalad iyo sinnaan ku aadan adeeg bixinta dheefaha iyo deeqaha Wales si loo hubiyo sharafta iyo ixtiraamka ee ku aadan la dhaqanka shakhsigaadka iyada oo aan la takoorin. Tani waxa lagu taageeri doona xeerar ka tarjumaya qaabka bulsheed ee ku aadan fahamka naafanimada ee ay qaadatay Dawlada Wales sanadka 2002dii.<sup>1</sup>
- dabacsan oo aan ku salaysnayn hal xal oo ku habboon dhammaan hababka oo si dhakhso ah ayuu uga jawaabi karaa isbeddelada iyo cadaadiska nololaha ay wajahayaan dadka degan Wales.
- buuxinaya baahiyaha kooxaha la haybsooco iyo kuwa danyarta ah kuwaas oo si gaar ah khatar ugu jira in ay soo wajahdo faqri, iyada oo la tixgelinayo kala duwanaanshaha dadka Wales sida uu dhigayo Sharciga Sinnaanta ee 2010.
- aqoonsanayo oo meesha ka saarayso caqabadaha dadka ka hor istaaga in ay codsadaan waxa ay xaq u leeyihiin oo ay si firfircoon uga caawiyaan dadka in ay helaan taageerada dhaqaale ee ay xaq u leeyihiin.
- qiimaynaya hababka iyo nidaamyada dadka isticmaali doona ka hor intaan ugu dambeyntii la hawlgelin.
- dhiirrigelinaya oo ka jawaabaya jawaab celinta si ay awood ugu siiso bixinta adeegga ugu wanaagsan ee suurtoogalka ah.
- samaynaynaya saamayn togan ee gudaha Wales kaas oo la jaanqaadaya Xeerka Fayoqabka Jiilka Mustaqbalka ee Wales Act. 'Horumar Dhammaan Dadka: Istaraatiijiyadda Qaranka.'
- xaqiijinaya in hindisaha cusub ee Wales ee loo qaabeeyey si loo dhamaystiro nidaamka dheefaha ee jira, iyadoo la aqoonsanayo daldaloolada nidaamka hadda jira.
- adeegsanaya adeega isticmaal wadaag ah oo ku aadan xogta dadweynaha sida waafaqsan Xeerarka Ilaalinta Xogta Guud (GDPR).
- u shaqaynaysa sida waafaqsan Heerarka Luuqadda Wales iyo Cabbirka Luuqadda Welsh (Wales) ee 2011, kor u qaadista iyo fududaynta awoodda muwaadiniinta ee ku aadan inay si fudud ugu galaan nidaamka hab fudud oo la heli karo.

<sup>1</sup> Qaabka bulshada ee fahamka naafanimadu ayaa samayso farqi weyn oo muhiim ah oo u dhexeeya naafanimada iyo laxaad la'aanta oo waxaa ay dib u dhigtaa waajibka saaran bulshada si meesha looga saaro caqabadaha sababa naafanimada. Si aad u ogaato wixii macluumaad dheeraad ah halkan guji [Social Model – Disability Wales](http://www.disabilitywales.org/social-model).  
[www.disabilitywales.org/social-model](http://www.disabilitywales.org/social-model)

# Hirgelinta Nidaamka Dheefaha ee Wales

**Dawladda Wales, maamulada maxalliga ah iyo la-hawlgalayaasha kale ee adeeg bixinta, daneeyayaasha muhiimka ah, iyo dadka helaya dheefaha ayaa ka wada shaqayn doona si ay u dejiyaan nidaam loo wada dhan yahay oo:**

- si cadaalad ah oo hufan u qoondeynaya adeegyada gudaha Wales oo dhan si loo bixiyo adeeg udub dhexaad u ah dadka.
- hubinaya in qof walba loola dhaqmo si siman, cadaalad ah oo aan takoor lahayn iyo in qaabka bulshada ee fahamka naafanimadu ay qaataan dhammaan la-hawlgalayaasha adeeg bixinta.
- habaynaya hababka iyo nidaamyada si loo daboolo baahiyaha iyo ikhtiyaarada shakhsi ahaaneed iyo sahaminta xeelado kuwaas oo hubin doona in hal mel oo dhexe oo laga helo dheefaha Wales si qayb loogu daro habab isgaadhsiineed oo badan - aaladaha dhijitaalka ah, adeegyada taleefanka, iyo hababka boostada ee isgaarsineed.
- u hoggaansamayo Heerarka Adeegga Dijital ah ee Wales<sup>2</sup>.
- fududaynaya aqoonsiga u-qalmitaanka taageerada maaliyadeed ee kale.
- kor u qaadaya wacyiga waxayna awood u siinaysa helida xuquuqaha iyada oo loo marayo:
  - i. gaarsiinta macluumaadka, iyadoo la isticmaalayo dhammaan hababka warbaahineed, kuwaas oo kor u qaadaya aragtida togan ee xaq u yeelashada oo ah qaabab la heli karo oo ay ku jiraan Akhriska Fudud ee loogu talay dadka heerarka akhris-qoriskooda uu hooseeya, BSL (Luuqada Dadka Maqalkooda Culusyaha ee Ingriiska) iyo luuqada bulshada iyo luuqada Welsh-ka.
  - ii. hubinta in shaqaalaha bixiya adeegyada dheefaha Wales ay yihiin kuwo aqoon iyo waayo-aragnimo leh oo ay helaan tababar joogto ah oo ku saabsan bixinta talooyin cusub iyo taageero ku habboon.
  - iii. u gudbinta dadka in ay helaan la talin madax-bannaan iyo taageerada isla markiiba si:
    - loo aqoonsado oo wax looga qabto sababaha dhaqaale xumada, ka caawinta yaraynta faqriga; iyo
    - loo caawiyo in ay sameeyaan codsigooda taageero dhaqaale iyo in ay ka hor imaan karaan go'aamada, iwm.
  - iv. sii wadida la shaqaynta Waaxda Shaqada iyo Hawlgabka (DWP) si kor loogu qaado wacyiga iyo kor u qaadida qaadashada dheefaha ay bixiso dowladda dhexe ee aan hoos imaan dowladda Wales.

---

<sup>2</sup> **Heerarka Adeegga Dijital ah ee Wales | Xarunta Adeegyada Dadweynaha ee Dijital ah**  
(<https://digitalpublicservices.gov.wales/guidance-and-standards/digital-service-standards-wales>)



# Yoolalka Jaartarka

- Kordhinta qaadashada dheefaha Wales, caawinta kordhinta dakhliga qoyska iyo gacan ka geysashada wax ka qabashada xaalada faqriga ee gudaha Wales.
- Xeerarka Wales ee xog-ogaalka ah oo ay horumarinteeda ku lug leeyihiin la-hawlgalayaasha iyo shakhsiyaadka iyo daneeyayaasha kale.
- Wacyigelinta ku aadan xaq u lahaanshaha dheefaha iyo taageerada la heli karo ayaa la horumariya iyada oo loo marayo hab isgaarsineed oo cad oo ku aadan dheefaha Wales ay bixiso iyo sidoo kale dheefaha ay bixiso dowladda dhexe oo sidoo kale wax ka qabanaysa khuraafaadka iyo fikradaha qaldan.
- Ballanqaadyada ku aadan kor u qaadista dakhliga iyo bixinta dheefaha daryeelka.
- Bulshooyinka dhaqaale ahaan u adkeysan kara ayaa la samayn karaa inaga oo hiigsanayna yoolkeena ku aadan yareynta iyo ka hortagga faqriga.
- Horumar toogan ayaa loo sameeya carruurta iyo dhalinyarada ka soo jeeda qoysaska dakhligoodu hooseeyo, inaga oo taageereyda in ay u yeeshaan mustaqbal wanaagsan oo ay gaaraan awooddooda buuxda.
- Waxaa hoos u dhacay baahida loo qabo gargaarka degdegga ah sida bangiyada cuntada maadaama qoysaska lagu taageerayo inay noqdaan kuwo dhaqaale ahaan isku filan.
- Waxaa helidda adeegyada lagu qiyaasaa tirada dadka lagu taageero nidaamyada dheefaha ee Dowladda Wales.

## Dhaqan gelinta Jaartarka

Marka ay la-hawlgalayaasha oggolaadaan ballanqaadyada ku jira Jaartarkan, waxay oggolaadeen inay la shaqeeyaan Dawladda Wales si ay tallaabo uga qaadaan horumarinta Nidaamka Dheefaha Wales ee joogtada ah oo u shaqeeya dadka Wales.

Tani waxa qayb ka ah samaynta waxqabadyada muhiimka ah ee la gaarsiin karo si loo abuurdo isbeddel.

## Sideen ku xaqiijin karnaa in natiijooyinka la gaarayo?

Qaab qiimeyneed ayay Dowladda Wales samayn doonta iyadoo la tashaneysa daneeyayaasha muhiimka ah, la-hawlgalayaasha gaarsiinta iyo shaqsiyaadka. Tani waa laga soo warbixin doona oo si joogto ah ayaa lola socon doona.

Jaartarka laftiisa ayaa sidoo kale dib loo eegi doonaa waqti ka waqti si loo hubiyo in ballanqaadyada iyo natiijooyinka ay wali ku habboon yihiin yoolalka.

Waxaan anaga oo hoosta ku saxeexan oggolaanay mabaadi'da ku jirta jaartarka iyo in aan la shaqayno dawlada Wales iyo kuwa kaleba si loo gaaro natiijooyinka.



# Warbixin Dheeraad ah

**Dhammaan su'aalaha ku saabsan jaartarkan waa in loo soo diraa:**

Waxda Wax ka qabashada Saboolnimada iyo Taageerada Qoysaska

Dowladda Wales

Rhydycar Business Park

Merthyr Tydfil

CF48 1UZ

limaylka: [tacklingpovertyandsupportingfamilies@gov.wales](mailto:tacklingpovertyandsupportingfamilies@gov.wales)